




Naga Caawi Sidii aan u Casriyeyn Lahayn Dugsiga Sarre ee Jefferson



Waxyaabaha Ugu Dambeeyey Mashruuca Jefferson ee Gu'ga 2023

Qorshaha Guud ee shaqada Dugsiga Sarre ee Jefferson waxay bilaabantay Gu'gii sanadkii 2022 iyada oo ay ka mid ahayd in dadweynuhu si ballaaran uga qeybqaatay. Bishii Diisember 13, 2022, Golaha Guddida Waxbarashada PPS waxay si wada jir ah u ansixiyeen Qorshahaasi. Qorshaha waxaa ka mid ah in dib u cusbooneysiin laxaadle lagu sameeyo dhismaha dugsiga oo markii hore la dhisay sanadkii 1909, iyada oo lagu kordhinayo dhismo cusub dhismaha dugsiga. Dugsiyada Dadweynaha Portland hadda waxay ku dhaqaaqayaan sidii ay u bilaabi lahayeen wajiga labaad ee naqshadeyda dib u cusbooneysiinta dugsiga.

Dugsiga Jefferson iyo Dib-u-Dejinta Goob Cusub Dugsiga Dhexe ee Harriet Tubman

Maadaama la ballaarinayo dariiqa I-5, Dugsiga Dhexe ee Harriet Tubman waxaa loo rarayaa goob cusub. Golaha Guddida Waxbarashada PPS waxay tixgalin siinayaa dhisitaanka Dugsiga Dhexe Tubman oo cusub iyo xarun KairosPDX oo labo qeybood ah, waxaana ku jira qeybta Koonfureed Dugsiga Sarre ee Jefferson. Kani waa mashruuc gaara ah laakiin dib u dejintu waxaa suurtagal ah inay saameeyso cib u cusoobeysiinta Jefferson. Wixii faahfaahin dheeraad ah waxaa laga helayaa halkan <https://www.pps.net/Page/20016>

OKulanada Socda ee Kooxda Tallo-bixinta Naqshada Dugsiga Sarre ee Jefferson (DAG)

Kooxda Tallo-bixinta Naqshada Dugsiga Sarre ee Jefferson waxay hadda qabanayaa kulankii caadiga ahaa, kulankaasi oo noociisu yahay mid dadweynaha u furan oo ah sidii loogu siin lahaa wixii jawaabcelin ahaa ee ku saabsan faahfaahinta naqshada iyo doorashooyinka casriyeynta dugsiga. Kulanadu waa kulano dadweyne kuwaasi oo ku dhiirigalinaya qof kasta inuu ka soo qeybgalo. Fadlan waxaad ogaataan, xubnaha DAG doorkoodu waxa weeyaan mid tallo-bixin kaliya ku kooban. Go'aanada faahfaahinta mashruuca waxaa ka mas'uul ah Xafiiska Dib u Cusboonsiinta Dugsiga oo la kaashanaya Hoggaanka Dugsiyada Degmada. Liistada kulanada soo socda ee DAG fadlan waxaad booqataa halkan: <https://www.pps.net/JeffersonBond>.

Jadwalka Mashruuca

GU'GA 2023-GU'GA 2024 Naqshada iyo Shatiga Oggolaanshaha

Naqshada Wajiga Horre, dukementiga dhismaha iyonidaamka shatiga oggolaanshaha dhismaha.

XAGGAAGA 2024-XAGGAAGA 2026 Waiga 1 Dhismaha

Ardaydu waxay ku sii sugnaan doonaan dhismayaasha hadda jira. Dhismayaal cusub ayaa la dhisay.

XAGGAAGA 2026-DAYRTA 2028 Wajiga 2 Dhismaha

Ardaydu waxay u guuri dhismayaal cusub. Dhismayaashii hore si dhammeystiran ayaa loo dayactiray. DSJ Dhammaantii Waa La Cusbooneysiyeey Waxaana La Furayaa Dayrta 2028.

Ka Qeybqaado Si aad Ula Socota Wararka Cusub

Wixii xog dheeraad ah iyo wararkii ugu dambeeyey fadlan waxaad booqataa halkan: <https://www.pps.net/JeffersonBond>.
Ka soo qeybgal liisada fariimaha loo diro ee mashruuca Dib u Casriyeynta Dugsiga Sarre ee Jefferson halkan:

JHSBond@pps.net.

